# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 38aad fadhigii 29aad** **25/12/2018**

**Ajendaha: -** Dooda Miisaaniyada Qaranka ee 2019-ka

**Quraanka: -** Md Xuseen Ismaaciil Yusuf

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Soo jeedinta Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Miisaaniyadda 2019-ka iyo Dooda Mudanayaasha ee Miisaaniyadda 2019-ka

**Gudoomiyaha:-** Xoghayntu ha u qaybiso Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Miisaaniyadda 2019-ka.

**Gudoomiyaha:-** Waxaan ku soo dhawaynayaa Guddida Dhaqaalaha si ay warbixintooda Golaha ugu akhriyaan.

**Md. Siciid Cartan Cismaan:-** Bismilaahi Raxmaani raxiim. Miisaaniyadan 2019-ka haddaan yare ego wax aka maqan meelo badan ama dhawr meelood oo qaar ka mid ah Hanti badani ka soo baxday. Hadaan hore ugu noqdo dee waxa weeyaan Hanti badan oo aynu lahayn oo Qarankan muhim u ahaa oo Hanti farabadani ka soo bixi jirtay waa la kireeyey, kiro ayaa lagu sheegay. Waxa u horeeya garoonkeenii caalamiga ahaa ee Berbera oo laga kireeyey Imaaraadka Carabta wuu kiraysan yahay, waliba waxaanu haynaa xogaha safar Madaxweynuhu ku tagay Imaaraadka ee heshiiskii marka hore lagaga kireeyey ayaa la kordhiyey, lacagta laga kireeyey waa lacagta ilaa 30,000,000 oo dollar ah, taas oo miisaaniyadda wax badan ka tari lahayd.

Saldhigaasi waxa uu ku kiraysan halkan Miisaaniyada Qaranka kama muuqato. Tusaale haddii aan u soo qaato Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle oo la waraysanayey oo la weydiiyey maxaa kaa soo gala saldhigyada wuxuu ku sheegay 40 Miliyan oo dollar ilaa 300,000,000 iyo dhawr iyo laabatan milyan oo dollar oo ka muuqda Miisaaniyada Qaranka Jabuuti.

Waxaan leeyahay Miisaaniyada ha lagu cadeeyo oo wasiirkaanu waydiin lahayne namaydun siinin, waxaa qabaa maadaama Hanti intaa leegi maqan tahay waxba yaanu maamulku ka meeraysane ha lagu soo cadeeyo oo ha lagu soo sheego taasi waa ta saldhiga.

Dekedii waatii Dp world la wareegtay, waxaan jeclahay in lagaga kireeyey 5 milyan ilaa 6 Milyan, waxa Iyana raacda lacag faa'iido ah oo dekeda ka soo baxda oo Iyana ahayd 10% iyo faa'iidayda kale ee aynu gaarka u lahayn. Taasna wax alaale iyo wax Miisaaniyada Qaranka kaga jirtaa ma jirto. Waxaan qabaa in ay tahay Hantida ugu weyn ee Qarankani leeyahay markaa mar haddii kuwaasi ka maqan yihiin anigu ma qabo in la ansixiyo Miisaaniyadan, waayo waah anti weyn oo Qaranka wax taraysa oo meel alaale iyo meel ay ku maqan tahay aynaan garanayn. Anigu waxaan qabaa in Goluhu arrinkaa aad iyo aad u eego oo aad iyo aad looga fiirsado.

Intaas waxa ii raacda dhawr iyo laabatn sanno Miisaaniyad ayuun baynu an sixinaa, waar dee miisaaniyadu wasaaradaha oo qudha maahee Goboladana waxba ma gaadhaan. Imika safar ayaanu kaga nimid Gobolka Saaxil anagoo nala diray. Waxaanu la shirnay isu duwayaashii mMiisaaniyad ayaad sheegaysaane $100 ayuu qaataa oo shiidaal ma leh, Gaadiid ma leh oo istaashinari ma leh. Waar miisaaniyada ma dhaafto wasaaradaha iyo masaariifta Wasiirada, inana waxaan nidhaa aynu u ansixino. Waxa in badan oo hore laga hadlay oo la yidhi waar Miisaaniyada ha la goboleeyo.

Waagii hore ii Siyad barre marka Miisaaniyada la ansixinyo Gobolada isuduwaha waaran ayaa u tagi jiray oo wax kastaa ku jiree. Waar dee Wasaarada iyo Wasiir uma shaqaynee dee haddii wuxu 27 sano gaadhayn dee Miisaaniyada ha la joojiyo. Goboladii waa ku gaajaysan yahay dhibaato badan baa ka taagan.

Anigu waxaan qabaa waar Miisaaniyadan dib ha loo celiyo oo aad haloo eego sida ay Gobolada wax u gaadhayaan oo hantidan maqana ha lagu soo daro. Qarankan uma baahna taas in Wasaaradaha uun loo baas gareeyo oo wixii Hargaysaba uu dhaafi waayo waan ka baxay.

**Md Cabdiqadir Jaamac Xaamud: -** Shir-guddoonka, Mudanayaasha, saxaafada iyo Martida waxaan ku salaamayaa sallaanta islamka Aslaamu Calaykum Warax-matulahi wa Barakaatu.

Runtii Guddidu warbixinta si wanaagsan ayey uga soo shaqaysay, laakiin sideedaba barnaamij marka la inoo keeno in la soo akhriyaa 24 saac waa muhiim Xeer-hoosaadkeenu ku qeexan yahay, Shir-guddoonkuna inay sharciyada Golaha iska indho tiraan waa laga fiican yahay runtii hawshii oo socota oo sharcigii si wanaagsan u socdaan in la murmo waa laga fiican yahay.

Runtii Guddidu meelihii ay tageen way ka reebeen Gobolka Sanaag iyo Soolba waan meelahay ahayd in la soo kobciyo oo ay tagaan oo maamul daadejin la sameeyo waxaanad moodaa in dalkiiba ay soo ururiyeen waxaanay ahayd inay sanaag tagaan oo soo eegaan anaguba had aka hor waanu soo eegnee.

Si kastaba ha ahaatee Goboladaas in muhiimad gaar ah la siiyo ayey ahayd oo miisaaniyada la Goboleeyo oo wax inoo kordhaan oo maamul daadejin la sameeyo, laakiin halkii 2005 aynu joognay in Miisaaniyadeenu wali joogto waa laga yar fiican yahay. Waxaanu hadda ka hor tagnay Gobolada isu duwayaashu way ka cabanayeen Miisaaniyada, waxaanay uga cabanayeen duruufaa imanaya. Waxaan xasuustaa mar Guddida Ilaalinta iyo dabagalka Hantida Qaranku Burco tagnay Wasiirkii iyo Isuduwihii ayaa isku qabsaday Barnaamijyadii oo lagau yidhi sii diyaari barnaamijyadii Gobolkan baa lagu ciyaarayaa isuduwihiina uu leeyahay waar wax aan hawsha ku qabto ma hayo oo shidaal ma hayo. Markaa haddii miisaaniyada la daadejiyo iyada oo duruufo badani jiraan, laakiin waxaan Guddida ku raacsanahay sida ay u soo dhigeen 2% Gobolada Barri oo yidhaahdeen ha mashaariiceeyo waanan ku raacsanahay Guddida.

Anigu waxaan qabaa inaga oo qiimaynayna duruufaha inagu meersan iyo xaalada dalka Miisaaniyada in la sii daayo, laakiin in la isla fahmo wixii miisaaniyada oo marka laga hadlayo ta Goboleeha in si fiican la isula fahmoo oo shir-guddoonkuna Mudanayaasha dhagaysto.

Waxaan leeyahay maadaama oo miisaaniyadu xiligeedii ka soo daahday oo xaalado badani inagu gadaaman yihiin oo dadka inta badani leeyihiin Miisaaniyadii maxaa Goluhu u haystaan oo su’aal la isweydiinayo, waxaan soo jeedinayaa in la sii daayo Miisaaniyada.

**Md. Cabdiraxmaan Abobakar Good: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Horta waxaan aad iyo aad u bogaadinayaa Guddida oo aad moodo in ay si wanaagsan u eegeen oo meesha ka saareen kordhinta Tacriifadaha Cusub ee cashuuraha taas oo ay ku jirtay cashuur aanay dadku qaadi Karin oo ilaa todobada qodob ah waanay ka saareen maadaama oo dadku waxaas aanu qaadi Karin. Kolkaas mar haddii laga saaray waxyaabihii dadku aanay qaadi Karin waxaan soo jeedinayaa in Miisaaniyada sideeda loo sii daayo oo la ansixiyo sidii Guddidu u soo dhigtayna lagu sii daayo waa sidaan qabo ee rayigaygu yahay Aslaamu Calaykum Warax-matulaahi wa-barakaatu.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Horta anigu waxaan ku bilaabayaa aad waxaan uga xumahay mashaariic badan baa lagu soo daray Miisaaniyada oo Gobolkaa aan ka soo jeedo ee saraar inaan wax badan loogu soo darin aad baan uga xumahay oo Wasiirkuna iga doonayo in aan ansixiyo, hortaas aad baan uga xumahay.

Ta kale markaan Miisaaniyada si guud u eegay horta waa Miisaaniyadii la soo qori jiray uun. Qodob hada laga doodayey oo ahaa in Miisaaniyada Gobolada iyo degooyinka loo dhaadhiciyo oo laakiin aad moodo in lagu saleeyey kharashaad wasaaradaha uun in lagu saleeyey oo Miisaaniyada dhaafi weydo xafiisyada Madaxda sar sare iyana waa qodob ka maqan siyaasada Miisaaniyada oo u baahan in Miisaaniyada lagu soo daro.

Qodobka kale een runtii islahaa aad ka doodid wuxuu ahaa tacrifahada la soo kordhiyey isna Guddidu ka saartay meesha. Su'aasha se aan is weydiinayaa waxay tahay imika cashuuraa la qaadaa markaa namabarka gaadhiga laguu bedelayo $60 ayaa lagaa qaadayaa $50 oo kale waa la raaciyaa $110 ayaa lagaa qaadayaa, markaa su'aashaydu waxa weeye halka ay sharciyada kaga salaysan tahay waa la isweydiinayaa. Guudida su'aashaa kamay jawaabin $110 la qaaday. Halkan waxay ku soo dareen $60 sababta si raacinaysa marka lambarka la bedelayo in buuga la bedelo tacrifadana kuma taalo inay wasiirka weydiiyeena ma garanayo.

Waxa jira markaynu wax soo saarka hadlayno wasaarado muhim ah kolay su'aalaha aan si weydiinayey waxa ka mid ahaa Wasiirkana fursada umaynu helin in aynu su'aalo weydiino waxa ka mid ah masalan aad waxaan uga hadlayaa hay'daha wax soo saarka eek u salaysan nolosha dadka, waxaan ka mid ah Wasaarada Beeraha, waxa kaloo ka mid ah Wasaarada Xoolaha iyo kalluumaysiga, waxa ka mid Wasaarada Biyaha, waxa ka mid ah Wasaarada Deegaanka Matalan sidaas Ayaan u eegay Wasaarada Warfaafinta oo kale sidaas ayaa u eegay 44,000,000,000 SL.Sh ayaa ugu qoran, Wasaarada Beerahana 17,000,000,000 SL.SH ayaa ugu qoran oo dheeli-tir kaasi ma jiro. Wasiirka Beeraha halkan marbaanu ugu yeedhnay oo waxaanu noo sheegay in wax soo saarrka ay siyaasad ka leeyihiin, markaa waxaan garan waayey waxa lagu saleeyey labaooda.

Matalan hay'adan yare ee duulista ayaa ka lacag badan oo waxa ugu qoran 15,000,000,000 oo SL.SH Wasaarada Beerahan 17,000,000,000 SL. Sh ayaa ugu qoran Wasaarada shaqadana 10,000,000,000 ayaa ku qoran, Guddida doorashooyinka oo kale 34,830,000,000 SLSh ayaa ugu qoran. Aniga daruuri maaha ayey ila tahay in Wasaarada wax soo saarka ee Biyaha, Beeraha, Xoolaha ay ka bataan Hay'daha duulista iyo Guddida Doorashooyinka waxyaabahaasi isuma dheeli tirna, inaguna ka Gole ahaan marka Miisaaniyada la inoo soo gudbiyo siyaasad aynu ka leenahay ma jirto. Markaa anigu waxaan odhan lahaa aynu waxyaabaha qaarkood aynu hoos u eegno arrinta ugu daran ee maanta wadanka haysataana waxa weeye noloshii, waxaan waxa ugu weyn ee ina hortaagan doorashana maaha wax kalena maaha, laakiin waa inaynu aad u eegnaa meelaha dhaqaalaha ee nolosha bulshada.

Waxa kale oo aan miisaaniyada ku arkay oo ka maqan siyaasada dhaqaalaha wadanka Miisaaniyadu waxay ka kooban tahay dakhli la ururinayo oo meelo laga soo qaadayo iyo kharashaad la geliyo, laakiin ilo dhaqaale sida loo abuurayaa way ka maqan tahay. Dabcan meelo yar yar wey ku jiraan, laakiin siyaasad dhaqaale oo sida loo kobcinayo

dhaqaalaha Miisaaniyada igama muuqato waana in aynu yeelanaa siyaasad dhaqaale soo daar oo aynu Miisaaniyada ku kobcino.

Waxaan leeyahay waa in mar kasta culayska la saaraa in wadanku wax soo saar yeesho ka dawlad ahaan iyo ka Gole ahaanba.

**Mrw. Baar Siciid Faarax: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim waan salaamayaa Golaha iyo Saxaafadaba Salaamu Calaykum Waraxmatulaahi Warakaatu Bacda Salaan Miisaaniyadan Qaranka ee la soo Gudbiyay sifiican ayaan u soo akhriyay mana aha Miisaaniyad isku dheeli tiran ama siday u kala mudnayd loo soo shaxeeyay Maaha.

Waad ogtihiinoo Dalkeenu Sixir barar, Macaluul iyo Dhibaato baahsan ayaa ka jirta, Markaa kama turjumayso miisaaniyadani sida uu dalku maanta yahay, Waxaa jira Wasaarad keliya oo 15 Wasaaradood la lacag ah, waxaa jira 1Wasaarad oo 5 Wasaaradood oo kuwa wax soo saarka ah ka lacag badan waxaad moodaa in aynaan in Miisaaniyadan inagu samaysan ee meel Dibada la inooga keenay xaqiiqdii, waxaayo waxaynu nahay dad muwaadiniin ah dadbaana sugaya oo xil inga saaranyahay, waxaanay ahayd inay ka turjunto wadankeenu halka uu joogo manta markaan soo qaato Wasaarada Warfaafinta waxay la lacag tahay Wasaarada Degaanka oo aad ogtihiin dhibaatada iyo dhuxul shidka haysta iyo Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha oo iyaduna Garoon la,aana iyo Dhibaatada haysata aad ogtihiin, Wasaarada Shaqo Gelinta maxay ku shaqaysaa waad ogtihiin oo gabigeedaba 10milyan ayaa loo qoraye, Wasaarada Beeraha waa Wasaaradii kali ahayd ee ay ahayd in la xoojiyo, Wasaarada Biyaha oo aad ogtihiin haraadka ka jira wadanka siiba magaalo madaxda oo aad ogtihiin Shantaa Wasaaradood waxay miisaanid leeg yihiin Wasaarada war-faafinta Markaa waxaad moodaa in miisaaniyada cid kale inoo samaysay xaqiiqdii.

Marka aan soo qaato Wasaarada Maaliyada waxay la lacag tahay Wasaaradaha kale oo dhan waana 242 Bilyan ama 243 Bilyan markaad eegtid Miisaaniyada wax Mashaariic ah oo ka muuqdaa ma jiraan oo wax laga qabanayo Sixir bararka, mee horumarkii, mee beerihii, mee Xoolihii, Mee kaluumaysigii mee Deegaankii, mee wixii wax soo saarka ee uu ka midka ahaa Garoonka Berbera ee la kireeyay, mee dekadii barbera ee Dpwold laga kireeyay intaasiba miisaaniyad kuma jiraan ee way ka maqan yihiin hay dii ay ku jiraana maaha wax suuro gal ah. Markaa carabta ma bilaash ayaynu ku siina oo inaga ayay wax inaga rabaan miyaanay ahay in ay dalka shaqo abuur iyo horuma ay ku soo kordhiyaan.

Caruurteenii lacagbaa laga qaadaa waxay u baahan yihiin iskuulo Free ah, waxay u baahan yihiin Scholarship, waxay u baahan yihiin Macaliinta oo Lacagta loo kordhiyo si ay tayadoodu u fiicnaato dadkii lagta haystay iskuulada gaarka ah ayay u yaaceen iyada oo aanay dadka danyarta ahi aanay iska bixin karin, markaa tayada waxaa ka qaaday wasaarada Tacliina waxa weeye nin Gaajoonaya oo Macalin ahi waxaa uu tagayaa

iskuulada gaarka loo leeyahay oo ka lacag fiican, oo uu uga cararay dhaale la'aan iyo dhibaatada haysata.

Illaahbaan idinku dhaaryee marka wasaarada Dhaqaaluhu ay tahay 243 Bilyan tahay halka ay wasaarada Tacliintuna 70 Bilyan, xilkaasi Xildhibaanada ayuu saaran yahay umadii idin soo dooratayna waa ay idin maqlaysaa waa in wax laga qabtaa Miisaaniyadan markaan soo qabto Mashaariicda ku jirta Miisaaniyadan oo ah Jeelasha iyo istayshanada markaa ma dadka ayaa la xidhxidhayaa? mee horumarkii mee waxsoo saarkii mee beerihii mee xoolihihii mee kaluumaysigii mee Degaankii mee wixii wax soo saar ahaa mee sixir bararkii in wax laga qabto ahaa

Waxaan soo jeedinayaa Xildhibaano in Miisaaniyadan aynu wax ka bedelno Dastuurkaa ina siiyay Umadaynu Masuul ka nahay Umadaa ina soo Dooratay in aan wax ka beddel ku samayno Masuuliyadeena weeye Cidna ka baryi mayno Dastuurkay ku qorontahay mida labaad waxa weeye sida Xildhibaan iga horeeyay uu u sheeegay Ilihii wax soo saarka ee uu kamid ahaa Garoonka Berbera iyo Dekedii Berbera ee DPwold ay qaadatay kuma jirto Miisaaniyada Baarlamaanka la horkeenay haday ku jiraana Maaha Wax suura gala maaha. Intaa markaan soo dhaafto waxaynu ognahay Shaqaalihii ka shaqayn jiray Berbera %70 inkabadan baa shaqo la'aan ah maanta, markaa Dekadii iyo Garoonkiiba waxaynu siinay Carabta maxaynu kaga iibsanay ma ictiraad ayaynu kaga iibsanay ma wax kalaa jira Xildhibaanada Sharafta leh waxaan usoo jeedinayaa Miisaaniyada in dib loo celiyo lagana soo shaxeeyo lana soo kordhiyo Wasaaradaha ay kamidka yihiin, Wasaarada Biyaha, wasaarada Deegaanka, wasaarada Shaqada, wasaarada Beeraha, wasaarada xanaanada Xoolaha, wasaarada Kaluumaysiga, Wasaarada Tacliinta iyo Wasaarada Caafimaadka, wasaarada caafimaad ka oo Golaha u jirta wax ka yar lababoqol oo taalo waad yaabaysaa sida ay tahay.

**Waxaan Soo jeedinayaa: -**

in miisaaniyada dib loo celiyo oo waxa laga soo baddelo meelaha ay ka midka yihiin wasaaradahan soo cosocda: - Wasaarada Biyaha, wasaarada Deegaanka, wasaarada Shaqada, wasaarada Beeraha, wasaarada xanaanada Xoolaha, wasaarada Kaluumaysiga, Wasaarada Tacliinta iyo Wasaarada Caafimaadka, waad mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid: -** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, saxaafada, shaqaalaha iyo marti-sharaftaba dhamaantiin ASC, Gudoomiye waxaan filayay inuu wasiirku u usoo diyaar garoobay maalintii dhaweyd in suaalo la waydiiyo uuna usoo gaxaystay teemkaa dhan maalintaa Gudoomiye waad fasaxday Masuuliyiintii Wasaarada ka Socotey Waad Fasaxday.

Doodiina maantaad dib ugu riixday maantana inalama joogaan Masuuliyiintii dee waxay ila tahay adna wakiil kama tihid Xukuumada noosoo gudbisay Miisaaniyada iyagiina waaku waasoo waa ay maqan yihiin Suaalo wixii la waydiin lahaana dee maalintaasna waad ka xidhay Maantana inalama joogaan.

Hadii wakhtigu cidhiidhi inagu yahay Cidhiidhi inagu yahay dibu dhacu kama iman goolahan masuuliyiinta mudanayaasha leh waa wakhti danbee aynu dedejino aynu ansixino dee aniga waxay ila tahay wixii aynu ka gudan lahayn wakhtigii aynu ka gudan lahayn waxaa ina seejiyay dibu dhaca miisanaiyada Cidii lahayd.

Ayaa dee ina seejisay hadaynu maalmo haysano oo aynu ka baaraan degayno laynaguma eedayn karo iyagaa Golaha Wakiiladaa dib u dhigaye cidii October laga sugayay ee Decemper 25keedii keentay ayaa horta masuuliyaddaa leh

Waxaan Soo jeedin Anigu waxaan soo jeedinayaa wakhti halaysku siiyo Wasiirkiina hala Hello Suaalo badanoo aanad adigu Gudoomiye nooga jawaabi Karin oo aanu waydiin lahayn Wasiirka. Ayaa na xoqanaya dee oo aanu haynaa Goomiye Baashe Xafiiskaad ugu tageysaaa? Dee mayee ugu tegi maynee Gole ayaynu nahay ee Golahaan ugu yeedhaynaa Gudoomiye horta adiga anigu Golaha beri horaan ku jiroo waxaad moodaa inuu Golahani inuu si u af-duuban yahay ayaad moodaa.

Fikradii Secondments heshaa in Cod lagu muquuniyaa mooyaane adiguna meesha kama qaadi kartid Gudoomiye. Gudoomiye Baashe, mudane Doodaada Wado Md. Xuseen; Dee aan watee adigaa iga leexinayaa igadaa leexinta aad iga leexinayso oo adiguna intaad leedahay qaado aniguna intaan leeyahay aan qaato.

Waxaan leeyahay fikradii secondment heshaa Gudoomiye Cod geli inuu goluhu isku wada raacsan yahoo inuu qaato iyo inuu halkaas kaga tago dee cod geli iminka taasi Seconment bay haysataa in Wasiirka loo yeedho oo codayn waxaan ahayna dee ima qabato in lay yiraahdo halkaasana kaga tegayaa. Ama keligaa dee Rule garayso**.**

Waxaan Soo jeedinayaa Sidaa ay Seconment-ka ay Mudanayaashu ay ku bixiyeen in Wasiirka aanu Su’aalo ka waydiinee Miisaaniyada Siyaalo badan bay dheeli tirnaani ay ugu jirtaaye siyaalo aad u badan Cadaalad daro badan baa ka muuqatoo oo Degaanada saamaynaysa. Ee cadaalad daradaasaan wax kawaydiin lahayn Nation land Cage baan halkan ku qayninaynaa Gobolo baynu ka hadlaynaa Nation land Cage inay dadka wada gaaadhaa baynu doonaynaa dee cidii u qaybin lahayd ee gacanta ku haysey aanu helno aanu waxka waydiino.

Talo waxaanu siin lahayna aanu siino markaa taas intaasaan ku dhaafay mida labaad Miisaaniyada Golaha Wakiilada markaan sidaa u eegay wixii Guddida Dhaqaalahu ay soo jeedisay ee ay tiri halaga wareejiyo Sob-hedka 03-02 ay u danbeeyaan halagu

wareejiyo ka kale way is dhintay way dhiman tahay dhinaashiyahaa kamay hadlin Guddidu Guddida dhaqaaluhu dhinaanshiyahaa kamay hadlin.

Anigu waxay ila tahay dhana guud ahaana waa ay qorantay halkii keliya ee saamaynaysay golo weynahuna wuu is dhimay dee anigu waxaan qabaa arinkaa gudi haloo saaroo halaysla eegoo kororsiimadaa iyo dhinaanshahaa siday isku qabanayaan dee halaga hadlo.

markaana taa golahaan usoo jeediyay Iyo shirgudoonkaba bal in gudi loo saaroo laysla eego arimihii badnaa oo dhan oo aan ka hadli lahaa aniga waa ay iga xidhan yihiin Gudoomiye Wasiirkay igaga xidhan yihiin.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

- ❖ Waxaan Soo jeedinayaa Sidaa ay Seconment-ka ay Mudanayaashu ay ku bixiyeen in Wasiirka aanu Su'aalo ka waydiinee Miisaaniyada Siyaalo badan bay dheeli tirnaani ay ugu jirtaaye siyaalo aad u badan Cadaalad daro badan baa ka muuqatoo oo Degaanada saamaynaysa.
- ❖ in Miisaaniyada ka hadalkeedana wakhti laysu siiyo oo aan laysku cidhiidhyinoo oon la odhan wakhti baa inaga dhacaya Wasiirkii iyo Cidii kamasuulka ahayd aynu helno Wasalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatu.
- ❖ Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in Gudi loo Saaro miisaaniyada is waafajisa dhinaasha ka muuuqda iyo korodhka ka muuqda sida ay isku qabanayaan tii ay guddidu soo gudbisay

**Md. Axamed Maxamuud Caateeye (Awoowe): -** mudanayaasha iyo shirgudoonkaba waab salamayaa sida aan wada ognahay Xukuumadu balanqaadyo meelo badan Oo Dalka Guud ahaan ay saamaynayso hadana waxaad moodaa meelo kamid ah balanqaad xukuumadu u hore u samaysay inaanay ka muuqanay.

Inaanay ka muuqanayn oo maxaa kamid ah aan Tusaale usoo qaato Dhismihii Wadada Adhi Cadeeyo iyo Xudun, oo Xisbigu noo Balan qaaday waa kamaqan tahay waxaan kaloo isleeyahay hadii maanta ay maanta dhaaftay war bal doorka danbe yaynaan dhaafin.

Waxaan kaloo taabanayaa Bilayska oo Miisaaniyada 14Milyan ee lagu kordhiyay baa waxaa iiga muuqatey xalay baan waxaan la hadlayay Degmada Xudun 2 Askari oo Bilays ah baa jooga markii hore 40 Askari baa loo Qoondeeyay xabadi kama joogto laba askari baa ka joogta. Intaasna waa loo kordhiyay waxaan leeyahay war bilayskana bal dib haloogu noqdo arintaas bal hoos haloo eego.

Waxaan kaloo ku darayaa wixii hada kadanbeeya ilayn hada tani waa ay socotaaye, in la ansixiyo bay inoo hortaalaaye in wixii hada ka danbeeya Miisaaniyada la Goboleeyo oo Gobol waliba iska arko.

Oo kii Dakhligiisu aanu ku filnayn korloo soo qaado kii dakhligiisu ku filan yahay kuwa kale wax laysku saabo saabeeyo laysku celceliyo waxaan leeyahay miisaaniyada ha la sii daayo waanad mahadsantihiin.

**Waxaan soo jeedinayaa: -**

In miisaaniyada tani way in dhaafatay oo ansixin ayay u joogtaaye in miisaniyadaha danbe la goboleeyo.

**Md. Xuseen Ismaciil Yuusuf:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafadu way salaaman yihiin, Dooddan Miisaaniyada 2019ka XIldhibaano badan baa ka hadlay halkii aan mari lahaa, waxayna Xukuumadu mudnaanta kowaad siisay siddeed qodob oo ay ka mid yihiin, Amniga iyo tayayntiisa, Garsoorayaasha, tayaynta Caafimaadka, Aqooni raadinta, Doorashooyinka iyo Horumarinta Tamarta iyo Macdanta arrimahaas oo dhan bay siisay mudnaanta kowaad ee ay wax ka qabanayso, siddeedaas qodoba waa kuwo dalku u baahan yahay ee haduu waayo aanu jiraynba haduu helo uu hagaagsanaanayo.

Miisaaniyada kumaan arag xal u helista sixir bararkan ina aafeeyay, sidoo kale kuma arag dakhliga sidii Xildhibaankii iga horeeyay sheegayay dakhliga laga qaato salkdhiga la siiyay Dawladan Imaaraadka iyo DP World waxay Dekada ka soo saartay midna laguma soo darin Miisaaniyada oo kuma jirto, waxaana ku taageersanahay Xildhibaankii iga horeeyay, Kuma arag sidoo kale Miisaaniyadan qaybta Horumarinta Dawlada Itoobiyaha waxaynu ka iibsano wax u dhigma oo aynu ka iibino oo iyaduna u baahan in wax laga talagalo. Laakiin siddeedaas qodob waa kuwo muhiima.

Aad baan ugu amaanayaa Gudidda inay ka saareen cashuurihii waliba 12 Wasaaradood baa cashuuraha kordhiyaye 6baa laga saaraye waxaan leeyahay 6da kalena ha lagasaaro baan leeyahya, inagoo Miisaaniyadiiba Ansixin baa la leeyahay cashuur baa la kordhiyay, dadkuna ma qaadi karaan, markaa waxaan soo jeedinayaa fikrad cusub oo inay suurtogalayso iyo in kale aanan garanayn, Dawlada Imaaraadka Carabta ee aynu heshiiska la galnay ee sodonka sanadood ka saxeexanay dekada laga kireeyay ee saldhiga aynu siinay lacag bay ina siiyeen sanadka waana waxaan miisaaniyada ku jirin, marka aniga waxaa ila quman inagoo raacayna sidii Xildhibaan Siciid Xukuumada Somaliland ay waydiisato in 20 sano inoo qadimaan $1 bilyan oo qudha inta sano ay noqotoba 15 ama 10 sano, oo lacagtaas halka bilyan ah aynu ku samaysano mashaariicda aynu u baahanahay sida in lixda Gobolba biyaha loo fadhiisiyo oo riigag waaweyn ee ceelasha laga qoday Itoobiyaha oo kale aynu qodano si ilaha wax soo saarka loogu horumariyo,

markaa Mashaariic laba ama saddex ah oo aynu kaga iibinayno wixii ka soo baxa Itoobiya inaynu samayno oo ku samaysano lacagtaas ayaan soo jeedinayaa.

Malaha dad baa ila yaabi doonee dalka Itoobiyaha saddex bilyan oo dollar bay siiyeen, eleteriya lacag bay siiyeen waa Imaaraadka, inaga wax alaale waxay, miyay ina diidayaan ilayn heshiis baynu la galnee wayna ogyihiin inaynu dal jira nahaye waxaan leeyahay halka bilyan aynu waydiisano, hal milyan lacag kuma aha oo 10 sano way inaga goosan karaane ha inoo sii qadimaan waxay inaga filnaanaysaa wax badan inaga.

**Waxaan soo jeedinayaa oo ku gabagabaynaa: -**

- Aynu ka amaahano Imaaraadka $1 Bilyan oo dollar si aynu ugu samaysano Mashaariic wax ina tara sida balaadhinta Biyaha iyo kobcinta Wax soo saarka.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige: -** Shirgudoonka iyo Xildhibaanadaba waxaan ku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, marka hore waxaan bogaadinayaa Gudiddii Golaha Wakiilka uga ahayd ee hawshan Miisaaniyada Warbixinta iyo Tallo-soojeedintaba ka soo samaysay waana ku amaanayaa. Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal sida ku cad siyaasada Miisaaniyada 2019ka ee Dawladu inoo soo gudbisay waxay ahmiyada saaraysaa dhowr iyo toban meelood xoojinta tayaynta garsoorka, Waxbarashada iyo Caafimaadka, Xoolaha, kaluunka iyo Beerahaa, aqoonsi raadiska, Doorashooyinka, kaabayaasha Dhaqaalaha, tamarta iyo Macdanta, Deegaanka iyo Daryeelka Shaqaalaha, markaad eegto siyaasada ay xambaarsan tahay Miisaaniyadan la soo diyaariyay iyo qoondooyinka la siiyay markaad eegto waxaan odhan karaa waa mid wax wayn wax ka taraysa haba yaraato Miisaaniyada iyo haynteenuye.

Miisaaniyada waxaa loo qoondeeyay Maamulka iyo Dawlada 35% baa la siiyay idinkoo og xaqiiqada, mandaqada aynu ku noolnahay iyo xaalada aynu maanta ku jirno, Caafimaadka 5% baa la siiyay, Waxbarashada 9% baa laga siiyay Miisaaniyada, Dhaqaalaha iyo wax soo saarka 3% baa laga siiyay, Kaabayaaasha dhaqaalaha 4.6% baa laga siiyay, Deegaanka 1.2% la siiyay, Biyaha iyo Nadaafada 1%, markaad tiradaa guud isu eegto 95% baa la siiyay intaas aan soo sheegay, hadii haynteenu yar tahay iyo waxaynu haynaa anigu ma qabo inay jirto waxaynu xukuumada ku canaanaa oo sadbursi ku sheegnaye, waxa inoo muuqata in si wanaagsan loo shaqeeyay oo loo qaybiyay, hadiise aynu rabno inaynu ka sii sadbursano oo wax badan la qabto dee xukuumada aynu ku taageerno oo cashuuraha faraha badan leh aynu u ogolaano oo ansixino si Miisaaniyada farabadan u soo baxdo.

Laakiin anigu waxaan u arkaa in Miisaaniyada si wanaagsan looga soo shaqeeyay wax badana wax laga qabtay markaad dhinacyo badan eegto oo 95% la siiyay hawlahaa aynu soo hadalnay, markaa xukuumada aynu kala qaybgalno ayaan odhan lahaa in

Miisaaniyad tan ka badan timaado markaasaynu odhan karnaa waxba dhiman ama way yar tahay inta halkaa loo qoondeeyay, laakiin wixiiba waynu aragnaaye.

**Waxaan Soo jeedinayaa: -**

- Sidaas Gudiddu soo jeedisay inaynu raacno, Goluhuna Miisaaniyada sii daayo markaynu raacino taladaas Gudidda dhaqaalaha.

**Md. Maxamed X. Maxamuud Cumar Xaashi:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Bahda saxaafada iyo dadwaynaha ASC, Gudoomiye anigu marka ugu horeysa waxaan ka hadlayaa Miisaaniyada, aduunyada meel si degdega Miisaaniyada lagu ansixiyaa ma jirto, Miisaaniyadu wakhti bay u baahan tahay, in aad loo darsay u baahan tahay, waxyaabo badan baan ka badali lahaa anigu, marka ugu horeysa siyaasada lagu sheegay Miisaaniyadan waa inay ka hadashaa xaalada aynu maanta joogno iyo Nolosha dadka iyo dhaqaaluahu maanta halkuu marayomaxaa inoo kordhay sanadkii aynu soo dhaafnay, maxaa ina xumaaday xaga dhaqaalaha ee sixir barar ah ee dhacay, dunida wax badan baynu ka soo iibsanaa waxaynu dhoofinaana ma jirto.

**Markaa Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa: -**

- Inaynu wakhti siino Miisaaniyada ee aynaan dadejin, waana in Miisaaniyada ay siyaasad balaadhani hagto.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**-----------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
**----------------------------------------**